# Cunto canugga loogu tala galay dugsiga hoose-dhexe, Macluumaad kugu socda adigaaga waalidka ah

## Codso cunto canugga loogu tala galay

Dhammaan carruurtu waxay xaq u leeyihiin inay iskoolka ku helaan cuntooyin wanaagsan oo nafaqo leh. Waa muhiim in ay ilmaha baareen hey'adaha caafimaadka ama iskoolku.

### Waxaad codsan kartaa cuntooyin canugga loogu tala galay haddii ay jiraan:

- Sababo caafimaad
- Sababo u damqasho leh
- Rabitaan ku aaddan cuntada dhirta

Uma baahnid inaad codsato cunto canugga loogu tala galay si uu ilmuhu u helo cunto khudradeed ama cunto uusan hilib doofaar ku jirin iskoolka.

### Si dijitaal ah uga codso barta intarnetka ee iskoolka

Waxaad codsiga ka heleysaa barta intarnetka ee iskoolka, cinwaan hoosaadka "cuntada iskoolka iyo waraaqaha cuntada". Haddii aadan fursad u haysan inaad si dijitaal ah u codsato, waxaad foom waraaqo ah u gudbin kartaa macallinka uu ardaygu hoos yimaado ama macallinka.

### Sannad dugsiyeed kasta goonidiisa ugu xaqiiji inuu ilmuhu leeyahay cunto loogu tala galay

Codsigayaga cusub ee dijitaalka ah waxaad u baahantahay inaad codsiga geliso marka ugu horraysa oo keliya, ka dibna uma baahnid inaad mar kale codsi sameyso ilaa uu ilmahaagu ka beddesho iskoolka ama ay baahidiisa wax iska beddelaan. Mar kasta oo uu billaabanayo xilli dugsiyeedka deyrtu, waxaa e-mail laguugu soo weydiin doonaa inuu codsigu wili sii taagaanyahay iyo in kale. Haddii aad haa ku jawaabto, uma baahnid inaad codsi cusub soo dirto.

### Waxaad u baahantahay inaad codsi cusub soo gudbiso haddii:

- Canugga baahidiisu ay is beddeshay
- Canuggu uu iskoolka beddelanayo

# Hey’adaha caafimaadka ama iskoolka ayaa baaraya baahida

Marka aad dirto codsiga, waxaa kula soo xiriiraya iskoolka si aad kulan uga yeelataan baahida ilmaha ee wax waafajinta. Haddii ay jiraan sababo caafimaad, waa inaad soo dirtaa caddayn taqtar ama waraaqo laga soo saaray faylka caafimaadka ee canugga.

## Sababaha caafimaadka ee cuntada loogu tala galay canugga, dhamaantood waxay u baahanyihiin warqad taqtar oo ka socota hay’ad caafimaad:

- **Waafajinta adayga cuntada ee canugga** – Cuntada oo adaygeeda la waafajiyo canugga sababo xagga ruugidda iyo liqidda ah awgood.
- **Tamar u kordhin** – Cunto lagu kordhiyay tamar dheeri ah
- **Cunto tamarteedu hooseysa** – Haddii ay tusaale ahaan jirto buurni, baruur ama cudur la xiriira sida uu jirku u isticmaalo tamarta.
- **Cunto la waafajiyay kaadi macaanka**
- **Cudur kale oo u baahan in wax la waafajiyo**

## Caddayn taqtar ama qoraal laga soo saaray faylka caafimaadka

Ilmaha waa in ay baareen hey’adaha caafimaadka ee Iswiidhan. Caddaynta taqtarka ama qoraalka laga soo saaray faylka caafimaadka waa in ay af-Iswiidhish ku qoreen taqtar, cunto yaqaan ama kalkaaliso caafimaad.

## Iskoolka ayaa oggolaanaya haddii ay jiraan sababo loo damqado

Haddii ay jiraan xaalado loo qiil dayo, waxaad codsan kartaa cunto loogu tala galay canugga marka uusan ilmuhu ka bixi karin inuu wax ku cuno goobta cuntada ee caadiga ah ama uusan cuni karin cuntada ku qoran liiska cuntada ee caadiga ah. In uusan qofku ka helin cuntooyinka ama raashinka qaarkiis maaha sabab loo damqan karo. Waa in ay sababtu ahaataa baahi gaar ah oo keeneysa in ay aad muhiim u tahay, ku dhawaad lagama maarmaan, si uu ilmuhu uga adkaado iskoolkiisa.

Ilmuhu mar walba wax waa ka qaadan karyaa cuntada caadiga ah, iyadoon taas loo eegeyn in jikada iskoolku ay u karisay cunto loogu tala galay iyo in kale. Hadafku waxaa waaye in, haddii ay duruuftu saamaxdo, uu ilmuhu kalsooni ku dareemo cunista cuntada caadiga ah

## Xagga cunto dhireedka looma baahna wax kulan ama baaritaan ah

Waxaa kugu filan inaad si dijitaal ah uga codsato barta intarnetka ee iskoolka si uu ilmuhu iskoolka uga helo cunto dhireed. Haddii aadan si dijitaal ah u codsan karin, waxaad foom warqadeed u gudbin kartaa macallinka uu canuggu hoos yimaado ama macallinka.

# Sheeg haddii uu ilmuhu fasax noqonayo

Haddii uu ilmuhu iskoolka ka maqnaanayo, uuna yahay qof loo diyaariyo cunto loogu tala galay, waa inaad taa ku wargelisaa jikada iskoolka. Waa inaad sidoo kale jikada iskoolka ku wargelisaa marka uu ilmuhu soo laabanayo mar kale.

## Haddii uusan canuggu soo guran cuntooyinkiisa loogu tala galay

Haddii uusan ilmuhu muddo 14 maalmood ah soo guran cuntooyinkiisa loogu talagalay, jikada iskoolkuna aysan helin wax macluumaad ah oo sheegaya in uu ilmuhu maqanyahay, waa la joojinayaa cuntada. Haddii uu ilmuhu mar kale u baahdo cunto loogu tala galay, waxaad u baahantahay inaad mar kale codsato.

# Xiriir

Wixii macluumaad ah ee dheeri ah ee ku saabsan cuntada loogu tala galay canugga ee dugsiga hoose-dhexe, kala xiriir jikada iskoolka ama maamule ku xigeenka iskoolka.